

Adeegyada Caafimaadka & Dadweynaha ee Degmada Brown Qeybta Caafimaadka Dadweynaha

Tilmaamaha Karantiilka ee la CUSBOONEYSIIYAY kuwaas oo loogu talagalay Xiriirada Dhow

Tilmaamahan hoos ku qoran ee la cusbooneysiiyay **waxay khuseeyaan oo keliya Xiriirada Dhow** (dadka aan la xaqiijin inay qabaan COVID-19, laakiin u dhowaaday qof la og yahay oo qaba COVID-19 sida hoos lagu sharaxay), **mana khuseeyaan dadka la xaqiijiyay inay qabaan cudurka COVID-19.**

I. Qeexitaanka Xiriirka Dhow:

Waxaad tahay "Xiriir dhow" haddii mid ka mid ah xaaladaha soo socda ay kugu dhaceen inta aad waqti la qaadanaysay qof qaba cudurka COVID-19, xitaa haddii qofku uusan lahayn astaamo waqtiga aad la xiriireysay/u dhowaanaysay:

- a. Aad si toos ah isku taabateen qofka (tusaale ahaan, hab siin, dhunkasho, ama gacan ku salaamid).
- b. Aad qofka u jirsatay 6 fiit wadar ahaan mudo ka badan 15 daqiiqo maalin gudaheed.
- c. Aad taabatay dheecaannada neefsashada ee qofka (tusaale ahaan, lagugu qufacay ama lagugu hindhisay; aad tabatay istiraashooyinka wasakhda ah ee qofka; aad la wadaagtay galaas cabbitaan, cunto, shukumaan ama waxyaabo kale oo gaarka u ah qofka).
- d. Qofka aad la noolayd ama aad joogtey/jiiftay guriga qofka habeenkii.

II. Tilmaamaha Xiriirka Dhow:

- a. **Xulashada Ugu Halista Yar (Karantiil 14 maalmood ah):** BCPH waxay sii wadaysaa inay Xiriirada Dhow kula taliso \ karantiilka ah mudo 14 maalmood ah. In kasta oo BCPH ay Xiriirada Dhow kula sii talineyso karantiil ah ilaa mudo 14 maalmood ah maadaama taasi ay tahay sida ugu habboon ee lagu xaddidi karo faafitaanka COVID-19, BCPH waxay fahamsan tahay in taasi aysan had iyo jeer suurtagal ahayn, waxayna BCPH u aragtaa Xulashooyinka Hoose ee Halistooda Dhexdhexaadka iyo Sare ah inay yihiin kuwo la aqbali karo oo lagu bedeli karo karantiilka mudadaas ah.



Public Health
Prevent. Promote. Protect.

Brown County
Health & Human Services

Adeegyada Caafimaadka & Dadweynaha ee Degmada Brown Qeybta Caafimaadka Dadweynaha

b. Xulashada Halista Dhexdhexaadka ah (Karantiil 10 maalmood ah):

Karantiilku wuxuu dhammaan karaa kadib maalinta 10aad iyada oo aan la samayn wax baadhitaanka **haddii** wax astaamo ah aan la soo sheegin intii lagu jirey kormeerka maalinlaha ah. Sii wadista kormeerka astaamaha, kala fogaanshaha bulshada, iyo xirashada maaskaraha waa inay socotaa ilaa maalinta 14aad.

c. Xulashada Ugu Halista Sareysa (karantiil 7 maalmood ah):

Karantiilku wuxuu dhammaan karaa kadib maalinta 7aad **haddii** natiijada baaritaanka muunada ay noqoto mid taban, **iyo haddii** wax astaamo ah aan la soo sheegin intii lagu jirey kormeerka maalinlaha ah. Sii wadista kormeerka astaamaha, kala fogaanshaha bulshada, iyo xirashada maaskaraha waa inay socotaa ilaa maalinta 14aad. Muunad ayaa lagaa qaadi karaa laguna tijaabin karaa 48 saacadood gudahood ka hor dhamaadka Maalinta 7aad, laakiin waxaa laga yaabaa in karantiilka aan la joojin ilaa kadib Maalinta 7aad.

- a. Baaritaanka COVID-19 waa in la sameeyaa maalinta 6aad ama 7aad si xulashadan ay u shaqeyso. Natiijo taban waa in la helaa ka hor intaadan ku laaban shaqada ama waxqabadyadaada maalinlaha ah markaad isticmaalayso xulashadan. Wakhtiga ugu horeeya ee aad dib u bilaabi karto waxqabadyada caadiga ah adigoo isticmaalaya xulashadan ayaa noqon karta Maalinta 8aad).

AFEEFASHO: Tilmaamaha kor ku xusan waxay ku saleysan yihiin talooyinka iyo macluumaadka laga helay Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC), iyo Waaxda Adeegyada Caafimaadka ee Wisconsin (DHS), laakiin ma aha beddelka talooyinka caafimaadka ee xirfadle caafimaad. Marka walaacyo caafimaad ay soo baxaan, waa inaad la xiriirtaa dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ah si aad uga hesho talo caafimaad sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah.

Xigashooyinka:

Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC): <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/more/scientific-brief-options-to-reduce-quarantine.html>

Waaxda Adeegyada Caafimaadka ee Wisconsin (DHS): <https://www.dhs.wisconsin.gov/covid-19/diagnosed.htm>

Muraajac 12.6.20



Public Health
Prevent. Promote. Protect.

Brown County
Health & Human Services